DAVID DOUGLAS
SCHOOL DISTRICT

Portland, Oregon

Learn · Grow · Thrive

Tilmaanta Waalidka ee Kaarka Warbixinta Ku Saleysan-Aqoonta ee Dugsiga Hoose

Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta Qaaliga ah,

Heerka dugsiga hoose ee David Douglas wuxuu hirgelinayaa kaarka warbixinta ee ku saleysan-aqoonta. Kaarka warbixinta ee ku saleysan-aqoonta wuxuu waalidiinta ka caawiyaa in ay fahmaan waxa ardaygu garanayo, ama uu awoodo in uu qabto, iyo waxa la baranayo ee weli loo baahan yahay in ay dhacdo si loo buuxiyo waxyaabaha la filayo in la gaaro dhammaadka sanadka. Kaarka warbixintu waa mid la siman Heerarka La raaco ee Gobolku Dejiyay ee Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska iyo Xisaabta. Cutubyada saynisku waxay ka turjumaan Heerarka La raacayo ee Sayniska Jiilka Soo Socda.

Heerarka la raacayo waxay si cad u bixiyaan waxyaabaha la filayo ee loogu talagalay aqoonta iyo xirfadaha tacliimeed ee looga baahan yahay in ay ardaydu bartaan taasi oo ah heer fasal oo kasta kaasi oo loogu talagalay inta sii hayaan jidka ay u socdaan ee qalin jabinta dugsiga sare. Macallimiintu waxay xaqiijiyaan in aqoonta iyo xirfadaha tacliimeed aan keliya la dhigan, balse ay tahay in la barto.

Kaarka warbixintu wuxuu waxqabadka tacliimeed ka soocaa caadooyinka shaqada, dadaalka, iyo dabeecada. Tani waa in la helo sawir sax ah oo la xiriira waxqabadka tacliimeed. Caadooyinka shaqada, dadaalka, iyo dabeecada waxaa lagu tilmaami doonaa qaybta "Xirfadaha Guusha" ee ku qoran kaarka warbixinta.

Waa mid aan rajeynayno in kaarka warbixinta ee ku saleysan-aqoontu, oo la socdaan kulamada macallinku, ay ku siin doonaan macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah si aad u fahamto isla markaana u taageerto waxbarashada ilmahaaga. Haddii aad hayso wax su'aalo ah ama aad qabto walwal, fadlan la xiriir macallinka ama maamulaha ilmahaaga.

Si Daacadnimo leh,

Brooke O'Neill

Brooke O'Neill
Agaasimaha Manhajka & Waxbarashada

Si aad u fiiriso nuqulka kaarka warbixinta ee cusub booqo Website-ka Dugsiga Degmada David Douglas. Kaararka warbixinta ee heerka fasalka waxaa laga helayaa meesha Waalidku ku qoran yahay ee la sii geliyo

SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO

Waa maxay ujeedada laga leeyahay kaarka warbixintu?

Ujeedada laga leeyahay Kaarka Warbixinta David Douglas waa in xiriir lala sameeyo waalidiinta, mas'uuliyiinta, iyo ardayda ee horumarka kaasi oo ku saabsan heerarka fasalka u yaala. Waa mid lagu aqoonsanayo heerarka aqooneed ee hada jira, dhanka kartida, iyo meelaha looga baahan in horumar la sameeyo.

Waa maxay faa'iidooyinka darajo u yeelida aqooneed?

Waxay muujinaysaa waxbarashada ardayga: Waalidiintu waxay arki karaan xirfadaha ay ardaydu barteen iyo waxa la baranayo ee weli loo baahan yahay in ay dhacdo si loo buuxiyo waxyaabaha la filayo in la gaaro dhammaadka sanadka. Waalidiintu waxay ogaan doonaan ardayda aqoonta leh ee diyaarka u ah in ay u gudbaan heerka waxbarasho ee xiga. Dhibcaha aqooneed waxay ka turjumayaan heerka waxqabada ee hada ee ardayga (ma aha dhibcaha caadiga ah).

Waxay ka caawisaa in macallinku wax dhigo: Darajo u yeelida aqoontu waxay macallimiinta ka caawisaa in ay ogaadaan farqiga jira ee dhanka waxbarashada iyo wax diirad saarida halka oo ay ardaydu u baahan yihiin waxbarasho dheeraad ah. Darajooyinka ku saleysan aqoontu waxay bixiyaan waxyaabaha joogtada ah ee laga filayo macallimiinta dhexdooda iyo dugsiga dhexdiisa.

Wuxuu waxbarashada ka dhigaa mid cad: Heerarka la raacayo waxay si cad u dejiyaan waxyaabaha la filayo ee loogu talagalay aqoonta iyo xirfadaha tacliimeed ee looga baahan yahay in ay ardaydu bartaan taasi oo ah heer fasal oo kasta kaasi oo loogu talagalay marka ay u socdaan qalin jabinta dugsiga sare. Ardayda iyo macallimiintu waxay leeyihiin bartilmaameed waxbarasho oo cad oo loogu talagalay heer kasta. Ardaydu in ay fahmaan waxa ay garanayaan isla markaana awoodaan in ay qabtaan iyo waxa la baranayo ee weli loo baahan yahay in ay dhacdo si loo gaaro isku filnaansho aqooneed.

Muxuu kaga duwan yahay kaarka warbixinta ee ku saleysan-aqoonta?

wuxuu kaga duwan yahay 2 waxyaabood oo waaweyn:

- **Waxa la qiyaasay:** Halkii keliya laga "Akhriyi" lahaa waxaad arki doontaa xirfado iyo fikrado gaarka si loo buuxiyo heerarka fasalka u yaala ee loogu talagalay Akhriska.
- **Sida loo soo sheego horumarka la sameynayo:** Halkii laga isticmaali lahaa darajooyin dhanka xarfaha ah (A, B, C), waxaa ardayda la siiyaa dhibco iyada la isticmaalayo qiyaas u dhaxaysa 1-4. Dhibcahan waxaa loo yaqaan heerka aqoonta.

Qiyaasta Aqooneed		
4	**Aqoonta**	Ardayga oo si joogta ah u muujiya aqoonta sare ee u leeyahay heerarka fasalka u yaala. Caddeynta ayaa muujisa awoodda loo adeegsan karo fikradaha ee xaaladaha kala duwan.
3	**Ku dhawaanshaha Aqooneed**	Ardayga ayaa awoodda in uu muujiyo fahamka qayb ka mid ah heerarka fasalka u yaala. Ardayga ayaa la yimaada caddeymo badan oo laga yaabo in ay ku jiraan qaladaad.
2	**Aqoonta Ugu Yar**	Ardaygu ma muujinayo fahamka heerarka fasalka u yaala. Ardayga ayaa la yimaada caddeymo aad uga hooseeya heerka fasalka.
1	**Caddeymo Aan ku filnayn oo La xiriira Aqoonta**	Waxaa jira caddeyn la'aan jirta si loo go'aamiyo aqoonta loo leeyahay heerarka fasalka u yaala.
NA	**Ma Khushayso**	Heerka u yaala lagagama hadlin simistarkan ama ardaygu waqti dheer kama diiwaangashaneyn dugsiga si hab sax loogu qiimeeyo.

Waa maxay macnaha "Aqoontu"?

Ardayga ayaa si joogta ah u muujiya aqoonta sare ee u leeyahay heerarka fasalka u yaala. Caddeynta ayaa muujisa awoodda loo adeegsan karo fikradaha ee xaaladaha kala duwan

Sidee ayaa dhibcaha loo siiyaa ardayda marka laga hadlayo heerka u yaala?

Waxbarashada iyo qiimeynta fasalka waxaa lala simaa bartilmaameedka waxbarasho oo la dejiyay iyada oo la raacayo heerka u yaala. Ardaydu waa in ay garanayaan waxbarashada bartilmaameedka ah iyo shuruudaha loogu talagaay guusha. Dhibcaha aqooneed waxay ku saleysan yihiin waxqabadka ardayga ee dhanka hawlo gaar ah ee uu qabto iyo qiimeynta, kuwaasi oo lala xiriirinayo heerarka u yaala waxbarashada.

Miyay tirada 4 ee ku qoran warbixinta ku saleysan-aqoontu u dhigantaa A ama tirada 3 miyaa loo tixgelinayaa in ay tahay B?

- Maya.
- Darajooyinka iyo heerarka aqoontu midba midka kale kuma xirna.
- Dhibcaha la isa siinayo ee "3" ee dhanka xirfada ama qoraalka ee bartamaha sanadka, waxay muujinayaan in ilmahaagu jidkiisii hayo si uu dhammaadka sanadka buuxiyo heerarka fasalka u yaala.
- Si kastaba ha ahaatee, haddii ilmahaagu dhibcaha uu keeno yihiin "3" **dhammaadka sanadka**, tani waxay muujinaysaa in isaga/iyadu aysan weli buuxin heerka u yaala heerkiisa/keeda fasal. Dhibcaha 4 waxay muujinayaan aqoonta loo leeyahay buuxinta heerarka fasalka u yaala.
- Halkii laga ogaan lahaa in ilmahaagu haysto A marka ay noqoto xisaabta, waalidiintu waxay ogaan doonaan xirfadaha gaarka ee ilmahoodu bartay iyo xirfadaha gaarka ah ee meelaha looga baahan in ay taageero dheeraad ah helaan.

Sidee ayaan ilmahayga ugala hadli karaa dhibcaha aqooneed?

Ilmahaaga kala hadal bartilmaameedkooda waxbarasho (heerarka u yaala) iyo waxa loo baahan yahay si loo gaaro bartilmaameedka. Ka caawi ilmahaaga in uu ka turjumo heerka uu gaarsiisan yahay (waxa isagu/iyada uu isla hadaba gaaray/ay isla hadaba gaartay iyo talaabooyinka uu/ay qaadi karo/karto si loo gaari aqoonta loo baahan yahay).

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu uu dib u dhac ku yimaado ama isla hadaba barteen heerarka fasalka u yaala?

- Macallimiinta ayaa ku tusi doonta tusaalooyin ku saabsan shaqada ilmahaaga si loo qeexo horumarkooda la xiriira heerarka la raacayo ee gobolka ee maado kasta.
- Macallimiinta ayaa ku tusi doonta waxa ilmahaagu u baahan yahay in uu shaqo wanaagsan qabto si loo kordhiyo awoodihiisa/awoodaheega isla markaana loo wanaajiyo meelaha aan isagu/ iyadu horumarka ka sameynayn ee la xiriirta ee heerarka fasalka u yaala.
- Dejinta hadafyo ku saleysan xirfadaha la bartay iyo xirfadaha u baahan in la wanaajiyo waa ujeedada laga leeyahay aqoonta ku saleysan darajo u yeelida.

Liiska Erayada Hadalka

Qiimeynta: Sida ardaydu u muujiyaan fahamkooda la xiriira waxa ay garanayaan/fahamsan yihiin isla markaana macallimiintu u qiimeeyaan baahida ardayga u qabo waxbarasho dheeraad ah. Waxaa ku jiri kara: mashaariic, bandhigyo, imtixaano, shaqooyin, jawaabo, qoraalo kala duwan, u kuur galid, iwm.

Manhajka: Waxa la dhigo.

Waxbarashada: Sida manhajka loo dhigo.

Heerka Aqoonta: Dhibcuhu waxay ku saleysan yihiin qiyaasta u dhaxaysa 1-4 kuwaasi oo muujinaya sida ay ardaydu ugu dhow yihiin gaarida heerarka u yaala.

Heerka u yaala: Xirfada(xirfadaha) laga filayo ardaydu in ay garanayaan iyo isla markaana awoodaan in ay qabtaan dhammaadka sanadka.

David Douglas School District
Portland, Oregon
Learn · Grow · Thrive

11300 NE Halsey St. / Portland, Oregon 97220 / 503-252-2900